Xeerka Caawimaadda dhaqaalaha iyo Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska lahayn

Ujeedada

Ujeedada dukumiintigaan waa in la dajiyo xeerka Iskaashatada Isbitaalka Carruurta ee Boston (Children's Hospital Corporation) d/b/a Boston Children's Hospital ("Isbitaalka") iyo Haayadahiisa Dhakhaatiirta ("Haayadaha") ee la xariira caawimaada dhaqaale ee la siinaayo bukaanada u qalma ee hela adeegyada lagu baxsho xarumaha Isbitaalka ama xarumaha Haayadaha halkaasoo lagu baxsho nidaamyada taageerada maamulka iyo shaqaale ka tirsan isbitaalka.

Bayaannada Xeerka

1. Isbitaalka iyo Haayaduhu waxay ku dadaalayaan inay adeegyo siiyaan carruurta u baahan daryeelka, ayadoon laga eegayn awooda dhaqaale.
2. Xeerkaan wuxuu quseeyaa dhammaan daryeelka degdega ah iyo kan caafimaad ahaan muhiimka ah ee uu baxsho Isbitaalka iyo Haayaduhu. Daryeelka degdega ah iyo daryeelka kale ee caafimaad ahaan muhiimka ah waxaan ku jirin qaliinada isqurxinta ee ikhtiyaariga ah.
3. Isbitaalka iyo Haayaduhu, ayagoo adeegsanaaya waaxda Talo bixinta dhaqaale e Isbitaalka, waxay ka caawin doonaa bukaanada/dadka bixinaaya qarashka bukaanka ee codsanaaya barnaamijyada dawlada ee la heli karo ama barnaamijyada BCH, oo ay ku jiraan caymisyada MassHealth, Commonwealth Care iyo Health Safety Net marka la heli karo.
4. Isbitaalka iyo Haayaduhu waxay caawimaad dhaqaale siin karaan bukaanada buuxiya shardiga u qalmida caawimaada ee lagu qeexay Qaybaha hoose ee Habraacyada Caawimaada Dhaqaalaha ama Qiimo Dhimista Bukaanka aan Haysan Caymiska.
5. Isbitaalka iyo Haayaduhu waxay ka dhawrsan doonaan dadaalo kasta oo ay ku aruursanayaan qarashka adeegyada degdega ah iyo kuwa caafimaad ahaan muhiimka ah ee bukaanada ka reeban in laga qaado talaabo looga aruurinaayo lacagta sida ku cad Xeerka Qarash aruurinta iyo Daynta ee Isbitaalka iyo xeerarka arintaan quseeya ee Health Safety Net, waxay celin doonaan lacag kasta oo laga qaaday bukaanada helay adeegyada degdega ah iyo kuwa caafimaad ahaan muhiimka ah, waxayna isdhaafsan doonaan xogta caymiska bukaanada iyo u qalmidooda barnaamijyada dawlada ama BCH.
6. Isbitaalka iyo Haayaduhu waxay bixin karaan qiimayaal la siinaayo dadka aan caymiska haysan oo lagu salaynaayo adeegyo gaar ah oo qiimo dhimis leh, sida qaliinka isqurxinta ee aan caafimaad ahaan muhiimka ahayn iyo qaliinada qaar oo kuwa wadnaha ah. Qiimo dhimisyada lagu qeexay xeerkaan ma quseeyaan qiimayaashaas gaarka ah.
7. Isbitaalku wuxuu, si waafaqsan Xeerka Daynta iyo Qarash Aruurinta, kordhin karaan qiimo dhimisyada in ka badan kuwa ku jira xeerkaan si qof iyo xaaladiisa ah si loo tixgaliyo xaaladaha gaarka ah ee dhibaatooyinka dhaqaale.
8. Haayaduhu waxay lahaan karaan xeerar dheeraad ah oo dhanka dhaqaalaha ah kuwaasoo qabanaaya bukaanada ka hela adeegyada Haayad ka shaqaysa xarun aan ka tirsanayn

© Boston Children's Hospital, 2018 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin.

Dukumintiga: Xeerka Caawimaadda dhaqaalaha iyo Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska lahayn

Isbitaalka (tusaale, bukanada adeegyadoodu aysan ku jirin jadwalka nidaamyada xogta ee isbitaalka).

9. Ku guul daraysiga raacida habraacyada lagu qeexay dukumiintigaan waxay keeni kartaa dib u dhac ama diidista Isbitaalka ama Haayaduhu kuu diidaan Caawimaad Dhaqaale.

Habraacyada

Talo Bixinta Dhaqaalaha

1. Isbitaalku, asagoo adeegsanaaya La taliyaashiisa Dhaqaalaha, wuxuu ka caawinayaa bukaanada/dadka qarashka bukaanka sinaaya Isbitaalka iyo Haayadaha ee codsiga barnaamijyada dawlada ama BCH, sida Medicaid, MassHealth, Commonwealth Care iyo Health Safety Net.

2. Bukaan kasta oo ku jira jadwalka Isbitaal iyo nidaamka diiwaan galinta asagoo ah bukaan aan caymis lahayn waxaa la siin doonaa caawimaada Talo Bixinta Dhaqaalaha.

    - Shaqaalaha Isbtaalka iyo Haayada ee masuulka ka ah jadwal mudaynta, diiwaan galinta, iyo biilka ayaa u sheegi doona bukaanada aan caymiska lahayn iyo/ama waalidiintooda sida ay ku helayaan Adeegyada Talo Bixinta Dhaqaalaha.

    - Boorar iclaaminaaya helitaanka Adeegyada Talo Bixinta Dhaqaalaha iyo sida lagu heli karo adeegyadaas ayaa lagusoo dhajin doonaa baraha diiwaan galinta daryeelka bukaanka iyo goobaha kale.

    - Foomka lacagta uu isbitaalka iyo Haayaduhu ku leeyihiin bukaanka waxaa ku jiri doona ogaysiis muujinaaya helitaanka Adeegyada Talo Bixinta Dhaqaalaha iyo sida lagu helaayo adeegyadaas

3. Shaqaalaha Talo Bixinta Dhaqaalaha ayaa ka caawinaaya bukaannada iyo/ama waalidiintooda:

    - Codsashada caymiska Medicaid, MassHealth, Commonwealth Care, Health Safety Net, ama barnaamijyada kale ee laga heli karo caawimaada dhaqaale

    - Fahmida xeerarka qiimo dhimista bukaanada aan caymiska lahayn ee lagu heli karo qarashaadka Isbitaalka iyo Haayada iyo sida loo codsado qiimo dhimistaas

    - Xogta lagala xariiraayo Waaxaha Qarashaadka ee Isbitaalka iyo Haayadaha

Barnaamijyada Caawimaada Dhaqaalaha

Qiimo dhimisyada soo socda ee BCH ga waa in la siiyaa bukaannada iyo waalidiinta/masuuliyiinta:

1. Adeegyada Isku jira/Caawimaada Kaalmada Dhaqaale ah

a. Bukaanka/Waalidku ma awoodo inuu dhiibo qarashka adeegyada la siiyay

b. Bukaanka/Waalidku wuxuu codsaday lagana aqbalay barnaamij dawladeed oo caawimaad baxsha. (MassHealth, Health Safety Net, Medicaid Ka baxsan Gobalka)

© Boston Children's Hospital, 2018 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin.

Dukumintiga: Xeerka Caawimaadda dhaqaalaha iyo Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska lahayn

c. Qarashaadka ama baaqiyada qarashka ee ka dhashay adeegyada caafimaad ahaan muhiimka ah ee uusan daboolayn barnaamijka dawladu, iyo/ama ilaa 60 maalmood kahor taariikhaha u qalmida barnaamijka lagu yeeshay bukaanka, waa la cafinayaa.

2. Dhibaatada Caafimaadka

a. Wuxuu ku kooban yahay adeegyada xaalada degdega ah iyo daryeelka daba galka ah xaalada ah ee caafimaad ahaan muhiimka ah

b. Bukaanku/Waalidku wuxuu codsaday Barnaamijyada Caawimaada Caafimaadka

c. Aan U qalmin barnamaijka Dhibaatada Caafimaadka ee HSN

d. Qiimo dhimisyada waxaa lagu go'aaminayaa dakhliga soo gala qoyska iyo qarashaadka caafimaadka ee la ogolyahay

3. Tixgalinta Xaaladaha Shaqsiga ah

a. Markay jiraan xaalado gaar ah, iyo si qof ba xaalkiisa ah, caawimaad dhaqaale ayaa la siin karaa bukaanada marka uu sidaas go'aansho Madaxa Waaxda Dhaqaalaha, Agaasimaha Sare ee Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka iyo/ama Agaasimaha Cadaynta Dhaqaalaha iyo Talo Bixinta Dhaqaalaha, kadib markuu la tashto Madaxa Haayada ku shaqada leh ama wakiilkiisa.

4. Shuruudaha Uqalmida

a. Boston Children's Hospital ayaa go'aaminaysa u qalmida barnaamijyada caawimaada dhaqaalaha oo lagu salaynaayo dakhliga. Qiimayaasha qiimo dhimista waxaa lagu go'aanshaa Tixraacyada Heerka Fakhriga ee Federaalka (FPG) qaabka soo socda:

Qiimo Dhimista Dakhliga Guud	
0%---200% ee Heerka FPG	100%
201---250% ee Heerka FPG	75%
251%---300% ee Heerka FPG	50%
300%---400% ee Heerka FPG	25%
>400% ee Heerka FPG	0%

Habraacyada Caawimaada Dhaqaalaha

1. Bukaanka/Waalidka waxaa loo gudbinayaa talo bixiyaha Dhaqaalaha ee Isbitaalka ama go'aaminta caawimaada dawlada ama barnaamijyada caawimaada dhaqaalaha ee Isbitaalka.
2. Bukaannada aan u qalmin caawimaada dawlada, xogta laga aruursho waxaa loo gudbinayaa Agaasimaha, Cadaynta Dhaqaalaha iyo Talo Bixinta Dhaqaalaha, si loo go'aansho in bukaanku u qalmo iyo in kale Barnaamijyada Caawimaada Dhaqaalaha ee Isbitaalka.
3. Bukaannada u qalma caawimaadda dhaqaalaha waxaa ansixinaaya Madaxa Dhaqaalaha ee Isbitaalka, Agaasimaha Sare ee Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka iyo/ama Agaasimaha, Cadaynta Dhaqaalaha iyo Talo Bixinta Dhaqaalaha, asagoo la tashanaaya fasaxna ka helaaya Madaxa Haayada ee ku shaqad aleh arintaas ama wakiilkiisa sida markaas haboon.

© Boston Children's Hospital, 2018 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin.

Dukumintiga: Xeerka Caawimaadda dhaqaalaha iyo Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska lahayn

4. Bukaannada/Waalidiinta loo ogolaado caawimaada dhaqaalaha waxaa si qoraal ah warka ku gaarsiinaaya Agaasimaha, Cadaynta Dhaqalaaha iyo Talo Bixinta Dhaqaalaha, ayadoo loo sheegaayo cadadka loo ogolaaday, taariikhaha adeegga la siinaayo, iyo adeeg bixiyaasha ku jira.

5. Koontooyinka waxaa lagu samaynayaa isbadal si loo waafajiyo xeerarka wax ka badalka caawimaada dhaqaalaha ee labadaba Haayada iyo Isbitaalka. Isbadaladaan waxaa la waafajin doonaa qarashaadka guud.

6. Bukaanka/waalidka waxaa laga dooni karaa inuu gudbiyo Codsiga Caawimaad Dhaqaalaha. Foomka codsiga ayaa lagasoo dagsan karaa webseetka Boston Children's Hospital waxaana laguugusoo diri karaa boostada ama si toos ah ayaad usoo qaadan kartaa.
Faahfaahinta ku aadan sida aad ku helayso nuqul kamid ah Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha ayaa laga heli karaa qaybta xeerkaan ee ciwaankeedu yahay "Daabacaada/Helitaanka Xeerka Caawimaadda dhaqaalaha iyo Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska lahayn, Xeerka Daynta iyo Aruurinta Qarashka, Xisaabinta Cadadka Guud ee Biilka La qaado." Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha waxaa la socda tilmaamaha sida aad codsiga u buuxinayso.

7. Asagoo adeegsanaaya nidaamka codsiga, bukaanka/waalidka waxaa laga dooni karaa inuu keeno dukumiintiga soo socda: xaaladiisa shaqada, cadaynta shaqada iyo dakhliga, cadaynta meesha uu dagan yahay tirada qoyska, cadayn kasta oo la xariirta caymis uu ka helo qolo sadexaad. cadaynta dakhliga waxaa ku jiri kara hal ama ka badan oo kamid ah waxyaabaha soo socda: canshuur celinada sanadkii hore, 4 risiid oo mushaarka shaqada hadda ah ama cadayn qoraal oo muujinaysa mushaarka kana timid cidda uu u shaqeeyo, jeega lacagta Social Security, jeega naafada ama cadaynta saxiixan ee muujinaysa inuusan helin wax dakhli ah.

8. Bukaannada/waalidiinta/codsadayaashu waxaa caawimaad laga siin karaa fahanka Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha iyo buuxinta Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha ayagoo wacaaya Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka oo lambarkoodu yahay (617) 355-7201 iyo/ama ayagoo caawimaad codsanaaya si shaqsi ah ama dhanka boostada oo ay u dirayaan Waaxda Talo Bixinta Dhaqaalaha ee Waaxda Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ee Boston Children's Hospital, 300 Longwood Avenue, Boston, MA, 02115, Farley Building rooms 160.1 and/or 160.2.

Xadiyada U dagsan Qarashaadka

1. Bukaan kasta oo u qalma caawimaad dhaqaale oo lagu baxsho xeerkaan, lagama dalban karo biil ka badan cadadka caadiyan lacaga qaado ("AGB") bukaannada caymiska leh ee la hela daryeelka xaalada degdega ah ama daryeelka kale ee caafimaad ahaan muhiimka ah. Dhammaan bukaannada kale ee caafimaadka ee u qalma caawimaad dhaqaale waxaa laga qaadayaa cadad ka yar qarashaadka guud.

2. Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka: Isbitaalka ayaa xisaabinaaya AGB ga asagoo adeegsanaaya Qaabka "Dib-U raacida". Sanad miisaaniyadeed kasta Isbitaalka ayaa go'aaminaaya boqoleey hal ah oo AGB ga lagu xisaabinaayo kaasoo lagu salaynaayo dhammaan sheegashooyinka si buuxda qarashkooda loo dhiibay lana siiyay xarunta isbitaalka ee bixisay daryeelka degdega ah iyo kan caafimaad ahaan muhiimka ah oo lagu jaangooyay qarashka Medicare- ee adeegga iyo dhammaan shirkadaha caymis bixiyaasha caafimaadka oo ay la jiraan lacag bixiyaasha rasmiga ah ee sheegashooyinkaas intii lagu jiray mudada kahor 12 bilood.

Qiimo Dhimista Maxaliga ah ee Bukaanka aan Caymiska Lahayn

1. Isbitaalka iyo Haayaduhu waxay siiyaan qiimo dhimis dhan 30% bukaanada maxaliga ah ee aan caymiska lahayn (dadka dagan Maraykanka) kuwaasoo buuxsha shuruudaha soo socda:

© Boston Children's Hospital, 2018 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin.

Dukumintiga: Xeerka Caawimaadda dhaqaalaha iyo Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska lahayn

- Aan lahayn caymis daboolaaya taariikhaha adeegga la siiyay. Adeegyada aan caymisku daboolin (tusaale, adeegyada aan ku jirin gunnada bukaanka ee bukaanku masuul yahay inuu dhiibo 100% qarashka; adeegyada ku jira gunnada, laakiin la baxsho kadib marka bukaanku dhamaysto dhammaan gunnooyinka ku jira qorshihiisa caymiska; iyo adeegyada ka baxsan xadiyada u dagsan shirkada caymiska) ayaa loo aqoonsanayaa adeegyo aan caymis lahayn.
- Bukaanku/qofka lacagta damaanad qaadaaya uusan si iskiis ah u joojin caymiska caafimaadka 60 maalmood ee lasoo dhaafay gudahood.
- Bukaanku uusan u qalmin caymiska Health Safety Net ama barnaamijyada kale ee dawlada.
- Bukaanku/qofka damiinka ah waa inuu la xariiraa Wakiilka Isbitaalka ama Haayada sida haboon si uu u codsado qiimo dhimis looga sameeyo lacagta laga qaadaayo.
- Bukaanku/qof damiinka ah waa inuu baxshaa lacagta oo buuxda sida ku cad baaqiga soo hara qiimo dhimista kadib iyo/ama waa inuu baxshaa waxa uu karo cadadka uu aqbalay Isbitaalku ama Haayadu uuna heshiiska qorshaha bixinta qarashka la galo Isbitaalka ama Haayada sodon maalmood (30) gudahood kadib taariikhda adeegga la siiyay.

2. Waxyaabaha aan ku jirin qiimo dhimista Maxaliga ah ee Bukaanka aan Caymiska Lahayn waa lacagaha bukaanka kusoo aada, qaybta caymiska iyo lacagaha caymisku goosanaayo. Qiimo dhimisyada lagu sameeyo xeerkaan kuma jiraan kuwa adeegyada aan caafimaad ahaan muhiimka ahayn (tusaale, adeegyada dantu ugu jirto bukaanka laakiin qarash bixiyuhu diiday waayo ma ahan kuwo caafimaad ahaan muhiim ah ama waxay ku jiraan qayb kale oo mar horaba loo sameeyay qiimo dhimis sida adeegyada xaraashka ah, qarashaadka caymiska gaariyaasha matoorka ku shaqeeya, iwm.).
3. Qiimo dhimisyada lagu baxsho xeerkaan waxay waafaqsan yihiin qarashka buuxa ee cadadka lagu heshiiyay lagumana daraayo baaqiyada koontada ilaa inta lacagta lagu heshiisyay oo dhan la dhiibaayo.
4. Bukaannada/dadka damiinka ka ah ayaa la siin karaa waqtiga qiimo dhimista adeegga oo ay ku helayaan adeeg ikhtiyaari ah midkood kahor ama marka la gaaro taariikhda adeegga.

Qiimo Dhimista Caalamiga ah ee Bukaanka aan Caymiska Lahayn

1. Isbitaalka iyo Haayaduhu waxay siinayaan qiimo dhimis dhan ilaa 25% bukaannada caalamiga ah (aan ahayn dadka dagan Maraykanka).
2. Waxyaabaha aan ku jirin qiimo dhimista Caalamiga ah ee Bukaanka aan Caymiska Lahayn waa lacagaha bukaanka kusoo aada, qaybta caymiska iyo lacagaha caymisku goosanaayo. Qiimo dhimisyada lagu baxsho xeerkaan ma qusayso qiimayaasha ee adeegyada arimaha gaarka ah (tusaale, qaliinka aan caafimaad ahaan muhiimka ahayn ee iskqurxinta), sheegashooyinka qolada sadexaad ama adeegyada ay diiday shirkada caymiska bukaanku ayadoo ku tilmaantay mid aan fasax loo haysan ama kabaxsan ururka.
3. Qiimo dhimisyada lagu baxsho xeerkaan waxay waafaqsan yihiin qarashka buuxa ee cadadka lagu heshiiyay lagumana daraayo baaqiyada koontada ilaa inta lacagta lagu heshiisyay oo dhan la dhiibaayo.

© Boston Children's Hospital, 2018 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin.

Dukumintiga: Xeerka Caawimaadda dhaqaalaha iyo Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska lahayn

Bukaanada Laga Reebay in Laga Aruursho Qarashka

1. Si waafaqsan xeerarka gobalka ee quseeya Health Safety Net iyo Xeerka Daynta iyo Lacag Aruurinta, bukaannada soo socda waxaa ka reeban talaabooyinka lacag aruurinta ee adeegyada uu daboolaayo barnaamijka quseeya

    - Bukaanka la diiwaan gashan MassHealth, ee gunooyinka ku helaaya Barnaamijka Gurmadka Degdega ah ee Duqoowda, Naafada iyo Carruurta, iyo barnaamijka Health Start (marka laga reebo lacagaha qaybta laga rabo bukaanka iyo lacagaha lagu goosto barnaamijkaan)
    - Ka qaybgalaha Caymiska Amaanka Caafimaadka ee Carruurta (Children's Medical Security Plan (CMSP) oo dakhliga qoyskiisu uu u dhigmo ka yaryahay 400% Tilmaanta Dakhliga ee Heerka Fakhriga Federaalka
    - Bukaan loo aqoonsaday mid danyar ah marka laga eego shuruudaha Health Safety Net, ee adeeg kasta oo uu u qalmo oo ay bixiso Health Safety Net sida lagu qeexay xeerarka arintaan quseeya ee Health Safety Net (marka laga reebo acagaha qaybta laga rabo bukaanka iyo lacagaha lagu goosto barnaamijkaan)
    - Bukaan ama qoys u qalma Dhibaatada Caafimaadka, marka laga eego cadadka biil kasta oo kabadan cadadka lagu siiyo caawimaada Dhibaatada Caafimaadka sida lagu xisaabshay xeerarka Health Safety Net.

Falalka Isbitaalku qaadi karo marka lacagta aan la bixin waxaa lagu sharaxay Xeerka Daynta iyo Aruurinta Qarashka ee Isbitaalka.

Daabacaada/U qalmida Caawimaadda dhaqaalaha iyo Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska lahayn, Xeerka Daynta iyo Qarash Aruurinta, iyo Xisaabta Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka

1. Dadka ayaa heli kara nuqulka xeerkaan, Xeerka Daynta iyo Qarash Aruurinta, iyo Cadadyada Caadiyan Laga Qaado Bukaanka si bilaash ah ayagoo ku helaaya mid kamid ah qaababka soo socda:

    a. Daabacaada Interneetka: Xeerka Caawimaadda dhaqaalaha iyo Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska lahayn ee Boston Children's Hospital iyo Xogta Kooban oo Luuqad fudud Ku qoran ayaa laga heli karaa barta oonleenka ah: www.childrenshospital.org/financialassistance

    b. Si toos ah: Koobiga xaashiyada ah ee Xeerka Caawimaadda dhaqaalaha iyo Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska lahayn ee Boston Children's Hospital iyo Xogta Kooban oo Luuqad Fudud ku qoran ayaa laga heli karaa Xarunta Isbitaalka oo ku taala 300 Longwood Avenue, Boston, MA, Farley Building room 160.1 and 160.2.

    c. Iimayl ahaan: Dadwaynuhu waxay codsan karaan inay nuqulka ku helaan boostada ayagoo wacaaya Taageerada Adeegyada Macmiilka ee Dhaqaalaha Bukaanka oo laga heli karo (617)-355-3397 iyo/ama Talo Bixinta Dhaqaalaha ee Bukaanka 617-355-7201.

© Boston Children's Hospital, 2018 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin.

Dukumintiga: Xeerka Caawimaadda dhaqaalaha iyo Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska lahayn

2. Turjumaadaha luuqadda shisheeya ee xeerkaan, Xogta Luuqada Fudud ee Caawimaada Dhaqaalaha, Xeerka Daynta iyo Xaruunta Qarashka, iyo Xisaabinta Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka ayaa lagu heli karaa luuqado kaladuwan si loo caawiyo dadka aan si fiican u aqoon Ingiriiska.

3. Isgaarsiinada Xarunta: Isbitaalku wuxuu samayn doonaa dadaalo si uu ugu sheego helitaanka caawimaada dhaqaalaha dadka asagoo adeegsanaaya qaabab kaladuwan.

    a. Boor ayaa lagu dhajin doonaa aagaga diiwaan galinta xogta helitaanka caawimaada dhaqaalaha.

    b. Boorarka bulshada iyo qaababka kale ee sida macquulka ah loo jaan gooyay soo jiidashada dareenka dadka isbitaalka yimaada ayaa si muuqata loogusoo dhajinayaa meelo kaladuwan dhammaan Isbitaalka.

    c. Koobiyada Xeerka iyo/ama xogta kooban ee luuqada fudud ku qoran ayaa la siin doonaa dhammaan bukaannada midkood waqtiga diiwaan galinta ama ayadoo qayb ka ah hanaanka isbitaal ka saarida.

Liiska Lifaaqyada La socda Caawimaada Dhaqaalaha Xeerka

1. Lifaaqa A: Liiska Adeeg Bixiyaasha Bixinaaya Daryeelka degdega ah ama Daryeelka kale ee Caafimaad Ahaan Muhiimka ah

Qaybaha Dukumiintiga

Ciwaanka	Xeerka Caawimaadda dhaqaalaha iyo Xeerka Qiimo Dhimista Bukaanka aan Caymiska lahayn		
Qoraayaasha	Thomas Pellegriti, Agaasimaha Canshuurta iyo Ku dhaqanka Xeerka Dhaqaalaha	**Taariikhda uu Dhaqan galaayo**	Sibteembar 30, 2016
Waxaa dib u Eegay/Muraaja ceeyay	Agaasimaha Sare, ee Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka, Boston Children's Hospital Gudoomiye Ku xigeenka Sare ee Dhaqaalaha, Boston Children's Hospital Mudane. Madaxwayne Ku xigeenka Sare iyo La taliyaha Guud, Boston Children's Hospital	**Taariikhaha Dib loo Eegay/La muraajaceeyay:**	Diseembar 7, 2017 Diseembar 7, 2017 Diseembar 7, 2017
Waxaa ansixiyay	Gudigga Agaasimayaasha ee Boston Children's Hospital		

© Boston Children's Hospital, 2018 Dhammaan xaquuquhu waa dhawrsanyihiin.